Gorfaynta Buugga la yidhaa ‘Guri waa haween’ ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan.



Cabdiraxmaan Faarax ‘Barwaaqo
Hal_aqoon@yahoo.com

Ammin laga joogo laba bilood baa muquuno ahaan la iigu soo diray dheeg ka mid ah buugga magaciisu kor ku xusanyahay. Dhambaal gaaban oo mahadnaq ah baan u dawiyey qoraaga oo ah Maxamed Baashe Xaaji Xasan. Dhawr casho kadib buu isna qoraal ii soo diray, kaasi oo uu igaga soo codsaday inaan wax ka soo idhaa buugga. Aniga oo xiisihii hore si xuf ah u dulmaray ayey khasab igu noqotay inaan mar kale akhriyaa. Haddaba kolkii aan akhriyey si weyna uga baaraandegey ayaan go’aansaday inaan aragtidayda idiin soo bandhigo. Arrintu siday doontaba ha ahaatee, waxan marka hore si kooban u eegi qiimaha uu qoraalku maanta innaga mudan yahay. Intaanan gudaha buugga u gelin waxan tilmaan kooban ka bixin magaca iyo muuqaalkiisa. Intaa kadib, waxan si toos ah ugeli qaybaha buugga aniga oo qaybkasta iskeeda u eegidoona, dhulkii aan ku hakadayna indin dareensiindoona.

Qiimaha qoraalka:

Runtii, qiimaha qoraal horaa loo sheegay. Shisheeye haynoo dambeeyee waatii Soomaaliyi tidhi, “Wixii la qoraa, quruuma hadhee muxuu hadal qaayo leeyahay?”1 Markaasi looma baahna inaan halkan kaga hadalaa. Waxase xusid mudan inaan ku caanbaxnay inaan nahay bulsho hadal. Xilligan oo aad, haddaba, mooddo in loo hayaamay dhanka qoraalka, qofkasta oo qalin iyo warqad isu qaadaa wuxu innaga mudan yahay ammaan iyo bogaadin. Sidaasi awgeed, Maxamed Baashe X. Xasan wuxu innaga mudan yahay hambalyo ee ha loo huro tu badan.

Magaca iyo Muuqaalka buugga:

Magaca iyo muuqaalka buuggu soo jiidasho yaab leh ayey leeyihiin. Waxaanad xasuusanaysaa maahmaahdii ahayd “ Wixii araggiisu ku deeqaa oontiisuna ku deeqdaa”. Hayeeshee, kol haddii aanu buuggu laba afle ahayn in hal-tebinta ladhka oogada sare lagu xardhaa may habboonayn. Waayo dadka aan af Soomaaliga sida fiican u aqoon, oo u badan dhallinta dalalka shisheeye ku

kacaantay ama kuwa aan aqooniniba, waxay u qaadanayaan inuu buuggu labada afba ku qoran yahay. Kolka uu qofku la boodo ee uu kala bixiyana wuu ka soo boodayaa oo wuu ku hungoobayaa. Tusaale ahaan, wiil aan dhalay oo ka mid ah dhallinta debedda ku kacaantay ayaa arkay buugga oo dul saaran miis. Intuu la booday buu yidhi, " Aabbo ma akhriyaa?" Waxan ugu warceliyey, " Haaye akhri." Kolkii uu kala bixiyeyna wixii uu filayey buu ka waayey waxaanu igu yidhi, " Oo aabbo waa af Soomaali keliyee!" Markaasaan ku idhi, "Oo maxaad fileysey?" Wuxu iigu warceliyey, " Waxan moodayey inuu labada afba ku qoran yahay." Intaasi waa intii gurigeyga ka dhacday. Qoraal-hayeennada iyo meelaha kalana maxaad ka filaysaa?

Obocda buugga:

Haddii aan obocda buugga hoos ugu daaddegno, guud ahaan wuxu buuggu ka kooban yahay afar qaybood. Qayb kastana, sida qoraalka wacan lagu yaqaan, waxa laga filayaa inuu qoruhu ku soo bandhigo aragtiyo uu ku taageerayo kartida haweenka Soomaaliyeed ee uu qalinka u huray. Haddii uu taasi ku guuldarraysto, hawshiisa oo dhammi waa hal bacaad lagu lisay.

Aan ku bilaabo qaybta koobaade, wuxu qoruhu qaybtan ku tilmaamay koritaanka hablaha isaga oo aan filayo inuu ugu sii gogolxaadhayey inuu inna dareensiiyo in haweenku hawl karnimada yaraan ku soo bilaabaan. Waxaanu tilmaamay in habluhu labajirka ku qabbaanaan, 5 jirka xansas ururinta ka adkaadaan. 7-10 jirkana ay hawsha guriga qayb ka qaataan. 12-13jir wuxu Maxamed sheegay inay garaadda goys noqdaan.

Kol hadduu qoruhu ka hadlay dhaqan miyi waxa habboonayd inuu aqoon korodhsiga sii wado oo uu tilmaamo waxyaalo badan. Tusaale ahaan, kolka ay inantu ku jirto da'da 7-10 gu' waxa loo yaqaan foodley ama dhoocil. 12-15jirka waa dhoorrey. Ujeed-dada dhoorku waa astaan tilmaan u ah in inantu da' ahaan iyo caqli ahaanba weli noqon mid la xiloodin karo oo guri xaslan karta. Waxa laga yaabaa in sida dadku u kala korriinsho duwanyahay ay inan 13jir ama 14jir ihi si la yaab leh u korto oo muuqaal ahaan loo arko gashaanti oo rag soo hungureeyo. Si aanay taasi u dhicin ayaa inanta dhoor loo yeelaa. Kol haddii ay inantu dhoor leedahay ninna ma hungureeyo. Kolka inanta loo arko inay da' ahaan iyo caqli ahaanba guur gal tahay dhoorka waa laga xiiraa si guud siman oo wanaagsani ugu soo baxo. Intaa ay xiirantahay waxa la yidhaa inantaasi way seemman tahay. Inta ay inantu seemmantahay qudheeda lama xiloodiyo oo ina rag ma haweysto. 17-20 jir kolka ay inantu tahay waa gashaanti isku tumatay. Dhan looga werweraana ma jirin, hawsha reerka gudo iyo debedba waa looga hadhaa si dhabana way u xaslataa.

Inantu kolka la guursado waxay noqotaa afo, maranti ama oori qofba sida uu u yaqaan. Waagii hore inanta iyo afada waa la kala garanjirey. Inan saddexqayd iyo timatid-cashaa lagu yiqiin. Afana gambo iyo kawiraad. Inantu kolka la guursado waxay ka gudubtaa heerkii inannimo oo timada-basho ama tidcasho markaasaa ugu dambaysa waxaanay isu dhigtaa afo reer leh.

Malkhabad bay qaadataa Gambana way ku kawirataa. Afada timaha tidcata Soomaalidu ma jecla oo waxa loo yaqaan saancadley2 .
Intaa kadib, wuxu qoruhu inna mihiib-siinayaa hawlkarnimada haweenka miyiga isaga oo tusaale badan ka bixiyey waxa ay qabtaan sida weel tolidda, culidda, hogeynta, dhiga saaridda, iwm. Hayeeshee hawlaha haweenku intaa way ka badan yihiin. Qoruhuna waxba kama odhan arahaysiga, cawsdoonashada, guulinta;dhaaminta, may -dhaxdiirashada, xadh-kasoohidda iyo xadhig tidcidda, iwm. Haweenka uu qoruhu kartidooda ka hadalayaa waa kuwii xoola dhaqatada. Waxa iga weydiina kuwa qodaalku miyaanay ayagu karti lahayn?

Intaanu qaybtan dhammayn baa qoraha ladh ku soo kacayaa. Wuxu tilmaamayaa wuxuu ku magacaabay dhir dhar xidhan, taasi oo ka mid ah dhibaatooyinka dhanka deegaanka ee uu keenay dagaalkii sokeeye. Waxan is weydiiyey waxa ka dhexeeya geedka bacdu fuushay iyo kartida haweenka! Waxa uu haddana tilmaan ka bixinayaa beero dadkii lahaa baloodho u qaybsadeen oo aanan garan saamaynta iyo halka ay kartida haweenku xidhiidhka ka yeesheen. Runtii waxan garaadsaday Hargeysa oo beero leh. Berigaa karti haween oo ay hoos u dhigeen lagama cabanjirin. Kolkii la baloodheeyey sida ay kartidii haweenka dhibaatada ugu geysteen baa iga yaabisay!

‘Dundumooyinka la xorday’ oo uu uga jeedo guryaha la dhistay ma garan halka ay kartida haweenka ka laba dibleeyeen. Waxad moodda inuu qoruhu kala saari la’yahay kartida iyo saamaynta ay il-baxnimada reer galbeed teennii ku yeelatay, taasi oo kolkii aynu qaadannay innagu qasabtay inaan teennii ka tagno. Taasina wax-soo-saarkii haweenka farsamayaqaanka ah ayey hoos u dhac ku keentay ee kartidoodi hoos uma dhicin!

Qaybta 2aad wuxu qoruhu awood xooggan isugu geeyey hal-abuurnimada haweenka. Wuxu tilmaamay jiritaanka qaybo hal-abuurka ah oo aan haweenka lala wadaagin. Tusaale ahaan, buraanburka, saarka iwm. Waxa uu si wacan u qeexay sida ay maansooyinka kale sida gabayga iyo jiiftadana ay ragga ula hal ritaan. Intaa kolka laga gudbo, waxad u geleysaa oo aad dareemeysaa kartidii haweenka iyo dhaqankii oo isku murugsan. Tusaale ahaan, bogga 188aad wuxu qoruhu ka sheekay-nayaa hablihii heermijirey. Heer-middu waxay ahayd il-baxnimo heer sare ah oo waagaa la gaadhay ee may ahayn wax kartida haweenka ku saabsan.

Bogga 190aad garasho iyo karti baa isku wanjalan. Tusaale ahaan, sheekada kabaca-laf kama hadlayso wax karti ah oo ay haweenku leeyihiin. Waxa tusaale loogu soo qaataa garasho dheeeridooda iyo garaad badnidooda.

Kolkale ayaad la kulmaysaa maahmaaho badan oo uu qoruhu ku tilmaamay in raggu haweenka u adeegsado. Markaad akhridana ma arkaysid mid qudha oo loogu adeegsado kartidooda. Waxay haddaba weydiintu tahay, ma wixii magaca haween ku saabsan baa la qorayaa mise wixii karti iyo hawlkarnimooda ku lug leh?

Qaybta 3aad ee buugga kolka la gaadho akhristaha fiirada dheeri madaxa ayuu la boodayaa. Waxaanu isweydiinayaa wixii uu akhriyayey waxa uu ku saabsanaa. Akhris-tuhu intuu buugga isku laabo ayuu ladhka buugga hubinayaa. Waxan odhankaraa qaybtani waa qaybta ismaan-dhaafku ka aloosmay ee markii geel loo heesay ay rag badani gorayo godolkeed u faadhuumays-teen.

Haddii aan idin xasuusiyo, buuggu wuxu ku saabsanyahay, sida qoruhu innoo sheegay, kartida haweenka. Kolkaa waxan garan la'ahay waxa keenay in laga hadlo taariikhdii wax barasho ee haweenka iyo cadaadiskii lagu hayey ama xaq u dirirkooda iyo dhulka lagula galgashay. Waxad halkaa ka dareemaysaa inuu qoruhu kaba baxay aragtidii uu qalinka u qaatay oo maayado nabdigiisa ku legdamayey mid ka mid ihi hoos ujiidatay. Waxan odhan waa meelaha ay buuggana dhaliisha weyni uga imanayso.

Sidii aan soo tibaaxay labada qaybood ee hore wuxu waxa kaga asteeyey hawl-karnimada haweenkii miyiga. Indhaha wuxu ka laliyey oo aanu tilmaamin intii aan tamarta lahayn ee ay ka midka ahaayeen: waxmatartada, dabbaasha, baalida, goom-baarta iyo basarida. Qaybtanna waxay ahayd inuu u qoondeeyo hawlkarnimada haweenka reermagaaloobey ee waxbartay. Waxtar-kooda oo uu qiraa hajoogtee, awooddiisa oo dhan wuxu saaray soo if bixinta dhibaata-dooda iyo dibindaab yadooda. Waxaanu ku xariiray inay tallaa-badoodii ka tageen.

Haddii, miyi laga yimid oo magaaladii daaro laga dhisay, waxan qoraha weydiinayaa quruxda guryahaasi hoostaal yaa qorshayn-teeda leh, ma rag mise dumar? Hooyada waxbaratay in badan bay tii miyiga kala mid tahay. Midna looguma iman karo. Hooyada wax baratay iyo tii miyiga joogtay waxay ka simayihiin ubad korin iyo reer xaslasho. Haddii carruurta miyi dhaqan iyo af la barijirey ta magaaladu waxay dheertahay inay dhanka waxbarashada ka gargaarto haddii af shisheeye wax lagu baranaya sidaasi ayey uga kaalisaa. Intii wax baratay, dhanka dhaqaalaha wax weyn bey reerka ku soo kordhiyaan. Waana inta tii miyiga la dheeryahay.

Qaybta u dambaysa oo ah ta 4aad waa qaybta ugu yaabka badan. Qoruhu wuxu ku soo ururiyey ilaa 600 oo magac3 oo ah kuwii haweenka. Intii isku xaraf ka kac daba qaar buu si gaar ah u qeexay. Intii aan akhriyayey waxan isweydiinayey hal -ka ay salaaddu iiga xidhmi la'dahay. Sida aan ka warqabo ma maqal magac hab -leed oo tilmaamaya karti iyo hawlkarnimo. Hablahana sidoodaba looguma magac bixiyo kartidooda. Sidaasi awgeed waxan garan la'ahay waxa qaybtaasi buugga loogu daray.

Ugu dambayntii, iimahaasi aan soo tibaaxay ka sokow, buuggu wuxu iftiinshey aragti cusub oo ah in la qiro kartida iyo kaalinta ay haweenka Soomaaliyeed bulshada kaga jiraan. Inuu midhkaa qoraa labihi kaga dhawaajiyaana waa libin haweenka u soo hoyatey. Dhanka suugaanta, waxa ku kaydsan suugaan haween oo aad u farabadan oo aan hore loo kaydin. Ciddii baadhitaan arrintaa

ku saabsan ku fooganina waa buug ay tixraac ahaan u adeegsan karto.

Dabashaal:

1. Cabdi Deeqsi Warfaa (Cabdi-sinimoo) baa laga sheegay inuu midhkaa yidhi.
2. Waa caado Soomaaliyeed. Waxa looga jeedaa haddii ay afadu timaha tidcato inay saadinayso geeri ku timaadda saygeeda. Waayo cid ay u feedhanaysaa ma jiridoonto.
3. Guri waa haween, bogga 12aad.